

**Farriinta Waalidka: Ka Warbixinta Hargabka Swine fluga #4  
Khamiis, May 14, 2009**

Waaliddiinta Mudan:

Xarunta Ka hortagga Cudurrada Faafa (CDC) waxay qeexidda jirradaas kusoo ururisay taasoo ilmaha calaamadaha xanuunkaas lagu arko laga reebo dugsiiga. Qeexidda cusub waa xummad qufac wadata ama/iyo cune cuncun. Waaxda Caafimaadka ee MN (MDH) waxay iyana ku qeexaysaa ka reebiddaas inay wixii ka badan ama la mid ah xummadda 100.0 darajo ee Fahrenheit ah tahay.

Waxaa haddaba lasoo jeedinyaa in ardayda iyo shaqaalaha lasoo ifbaxa astaamahaas oo ay ka midka yihiin durayga dareerka sanko, ay gurigooda joogaan ugu yaraan (1) maalin si looga sii baaraan dego astaamaha kale ee uu gadaal kala yimaado.

Haddaba carruurta iyo shaqaalaha xummadaas qaba, oo ay weheliso qufac iyo/ama cune cuncun, loo tixgeinayo inay qabaan cudurka hargabka (ILI) ilaa baaritaan kale lagu caddaynayo (tusaale, “xaleefka cunaha dheecaanka looga qaado”) laga samaynayo. CDC waxay intaa raacisay oo ay soo jeedinaysaa in caruurta iyo shaqaalaha qaba ILI ay guriga joogaan muddo (7) cisho ah ama 24 saac KADDIB markii lagu arkay calaamadaha cudurka, hadba kii dheeraada.

Inkastoo viruska H1N1 u muuqdo inuu u dhaqmayo sidii hargabka xillileyga ah marka loo eego ba’naantiisa iyo fidistiisa, haddana waa muhiim in la xusuusnaado inuu yahay virus cusub oo ay jiraan dad u nugul oo uu khatar sare oo la xiriirta waxyeellada uu ku keeni karo iyo inuusan tallaalka hortag lahayn toona.

Waxaan kuu soo gudbin doonnaa wixii kaloo khabaar isa soo tara kolba siduu noo soo gaaro. Waxaan kaloo kugu dhiirrigelinaynaa inaad sii waddid inaad kala xiriirtid wixii kaloo faahfaahin dheeraad ah Shabakadda MDH:  
[www.health.state.mn.us](http://www.health.state.mn.us) ama tan CDC: [www.cdc.gov](http://www.cdc.gov)

Waad ku mahadsan tahay wada shaqayntaada sidii ilmeheenna iyo dugsiyadeenna caafimaadkooda loogu dadaali lahaa.

Les Fujitake  
Superintendent  
Bloomington Public Schools